

[Return location]
[Return address 1]
[Return address 2]
[City state ZIP]



Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

MM/DD/YYYY

Client name
Client address
City, state, ZIP

Waalidka ama mas'uulka qaaliga ah **FIRST_NAME**,

Barnaamijka cusub ee Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta (CEN) wuxuu u adeegaa carruurta yar yar ee qabta baahiyaha caafimaad ama hab-dhaqan oo aad u sarreeya. Ilmahaaga si nasiib ah looguma xulan mid ka mid ah boosaskii u horreeyay ee barnaamijka.

Wuxuu yahay lambarka WAITLIST-NUMBER uu kaga jiro liiska sugitaanka.

Waan ogahay in kuwo badan oo idinka mid ah ay ahaayeen kuwo si adag ugu doodayay barnaamijkani muddo dhowr sano ah. Waad ku mahadsan tiihiin wax u doodistiina. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) wuu maqlay oo arkay sida uu barnaamijkani muhiimka ugu yahay adiga iyo qoyskaaga. Waa mid jira iyada oo sababtu tahay adkeysigaaga iyo shaqadaada adag.

In aan la isa soo xulan waxay u badan tahay in ay keento niyad jab badan, xanaaq iyo in laga xumaado. Miisaaniyadda \$3-da milyan ee barnaamijka CEN dhexdeeda, waxaa jira oo kaliya dhaqaale ku filan in lagu diiwaan geliyo 155 ka mid ah 1,500 ee carruurta ah. Si loo fahmo sida uu u shaqeyn doono liiska sugitaanku, fadlan dib u eeg macluumaadka hoose.

Haddii aad u baahan tahay fursadaha kala doorasho oo kale, fadlan la xiriir isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga. Haddii uu ilmahaagu uu ku jiro liiska isku gudbinta barnaamijka CIIS, fadlan email u dir ciis.referrals@odhsoha.oregon.gov.

Sida liiska sugitaanku u shaqeeyo.

- Sida uu u kala horreeyo liiska sugitaanka isma beddeli doono. Ilmahaagu wuxuu kor u soo kici doonaa liiska marka boosas furmaan. Tani waxay ka dhigan in lambarkiisu yaraan doono. Marka uu gaaro lambarka 1, wuxuu halka u horreysa ka soo gali doonaa liiska sugitaanka.
- Kani waa barnaamij cusub, ma jiro hab weli lagu ogaan karo sida dhakhsaha ah ee liiska sugitaanku u dhaqaaqi doono.
- Kuwii bilawgii la xushay waxay haystaan ilaa Luulyo 19 si ay u go'aansadaan haddii aad rabaan in ay isku diiwaan geliyaan barnaamijka. Haddii uu jiro furitaan, ODDS waxay u jeesan doontaa liiska sugitaanka. Haddii boosas furmaan loogu talagalay ilmahaaga, ODDS waxay warqad kuu soo diri doontaa muddo ku beegan Ogoosto 31. Warqadani waxay sharxi doontaa shuruudaha iyo nidaamka codsiga. Wuxuu kaala soo xiriiri doonaa isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga. Wuxuu kaala soo xiriiri doonaa tallaabooyinka xiga.
- Ka dib Ogoosto 31, ODDS waxay isku duwayaasha adeegyada u soo diri doontaa liiska sugitaanka oo la cusbooneysiyyay bil kasta. Waad la xiriiri doontaa iyaga si aad u ogaato booska uu ilmahaagu kaga jiro liiska sugitaanka. Haddii uu ilmahaagu ku jiro liiska isku gudbinta barnaamijka CIIS, fadlan email u dir ciis.referrals@odhsoha.oregon.gov.
- Iyada oo hore loo sii socdo, qoys ama ilme kasta ayaa codsan kara in ay ku soo biiraan liiska sugitaanka. Wuxuu kaala soo xiriiri doonaa dhammaadka liiska sugitaanka.

Ilaha iyo su'aalaha

Haddii aad hayso su'aalo, fadlan la xiriir isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga. Waxaad sidoo kale email u diri kartaa cenprogram@odhs.oregon.gov.

Waxyaabo dheeraad ah ka ogow bogga internet-ka ee barnaamijka Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta:

<https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/sb-91-implementation.aspx>.



Waxaad sidoo kale iskaan gareyn kartaa code-ka ku jira qalabkaaga gacanta si aad u booqato bogga internet-ka.

Mar kale, waad ku mahadsan tiihin dhammaan intiina u dooday barnaamijkani muhiimka ah. Waxaan rajeynaynaa in aan kula shaqeeyo si aad u hesho tallaabooyinka mustaqbalinka, waxa wanaajinta iyo xalalka si hab fiican loogu adeego carruurtaada.

Si Daacadnimo leh,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Dana Hittle".

Dana Hittle
Agaasimaha Ku meel gaarka ah
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille, ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811 ama email u dir dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha, booqo oregonrelay.com ama fcc.gov/encyclopedia/trs-providers